



# San Diego Unified School District

EUGENE BRUCKER EDUCATION CENTER  
4100 Normal Street, San Diego, CA 92103-2682

Febraayo 7, 2008

William A. Kowba  
Madaxa Waxbarashadda Dugsiyada Ku-meel-gaadh

Mudane Waalidiin ama Dadka ardeyda masuulka ka ah:

Maadaama aan bilaabeyno sameynta miisaaniyada sannad-dugsiyeedka soo socda ee 2008-09, waxaa ina soo food saartey arrimo dhaqaale oo qallafsan. Go'aamada laga gaadheyo miisaaniyadu waxay noqon doonaan kuwo dhammaanteen la inooga baahan yahay inaanu u hawl galo, haddii aanu nahay – waalidiinta, shaqaalaha, guddiga waxbarashadda ee degmada iyo jaaliyada – si aan halkaas uga sii wadno waxyaabaha carruuteenna iyo dugsiyadeenna u wanaagsan.

Dadka intooda badani waxay wararka madaxiisa ka maqleen arrimaha “xaaladaha miisaaniyadeed ee deg degga ah” kuna saabsan dawlad-goboleedka California. Guddoomiyaha dawlad-goboleedka California Mudane Schwarzenegger wuxuu soo jeediyey in si weyn loo dhimo ama yareeyo dhaqaalaha dawlad-goboleedka ee adeegyada iyo barnaamijyada ku baxaya, taas oo ay ku jirto in boqolaal malyan oo doolar *sannadkan* waxbarashadda laga jaro, iyo in *sannadka soo socda* la dhimo lacaga dhan \$4.4 balyan oo doolar. Waxaan dugsiyada waxbarashadda ee ku yaal California kala qeyb qaadaneynaa siyabihii aan miisaaniyadaas u habbeyn lahayn, taas oo ujeeddadu tahay bal inaan yareyno saameynta ay fasalada iyo ardeyda ku yeelaneyso.

Miisaaniyada sannad-dugsiyeedka 2008-09 waxaa saameyn ku yeelan doona dhawr arrimood oo ay ka mid yihiin:

- In la odoroso ama saadaaliyo saameynta ay leedahay dhimista ee Guddoomiyaha dawlad-goboleedku soo jeediyey,
- In la yareeyo miisaaniyada barnaamijka iyo deeqaha kale ee dawlada-dhexe laga helo,
- In la yareeyo kharashayada barnaamijyada “gaarka ah” logu talagalay,
- In sharci “cusub” loo sanmeeyo miisaaniyada barnaamijyada “gaarka ah” loogu talagalay,
- In waxyaabo badan oo kharashyada dugsiyada ah la kordhiyo,
- In la habbeeyo jadwalka mushahaarooyinka shaqaalaha, iyo
- In la kordhiyo kharashyada caafimaadka iyo kaalmada daryeelka bulshada.

Bilowga saadaashu waxay muujisay in la dhimo kharashyada qiyaas dhan \$70 malyan. Waxaa ku tallaabsaney inaan sannad-dugsiyeedkan la dhimo ama la yareeyo kharashyada xafiiska xarunta dhexe ku baxaya. Intaas waxaa wehelisa, waxaa waax kasta oo ku taal xafiiska dhexe laga dalbadey inay miisaaniyadooda dhimaan boqolkiiba 10-15%. Barnaamijyada uu xafiiska dhexe miisaaniyada siiyo waxaan kale oo isku dayeynaa inaan habbeyno, taas oo saameynta ugu yar ardeyda ku yeelaneysa.

Dhimista miisaaniyada lagu sameynayo xataa xafiiska dhexe wey ka sii gudbi doontaa. Waxaan shaqaalaha, adiga iyo waalidiintaba ka codsaneynaa inay noo soo gudbiyaan wixii talooyin ah ee ku saabsan sidii kharashkana loo yareyn lahaa, dakhligana loo kordhin lahaa. Dhammaan fikradaha waan soo dhaweynaynaa, waanan tixgelin doonaa. Si aad waxyaabo dheeraad ah u sii ogaatid, fadlan waxaad booqataa shabakada Internetka ee ah [www.sandi.net/budget](http://www.sandi.net/budget). Shabakadan Internetka waxaa ku yaala warbixino ku saabsan siyaabaha loo sameeyo miisaaniyada waxbarashadda degmada, wakhtiga ay qaadaneyso, iyo meelaha aad khadka internetka fikradaada ku soo diri lahayd.

Waxaan idiin ka mahadcelineyaa, una baahan nahay taageeradiinna joogtada ah ee ku saabsan sidii aan u maareyn lahayd macluumaadka aan heli karo, si aan ardeyda iyo macallimiinta u caawino. Marka aan warbixin cusub ka helo dawlad-goboleedka ayaan warbixinada ku saabsan qorshaha miisaaniyada idin la socodsii doonaa.

Mar labaad waxaan idin ka mahad celineyaa dadaalka aad ugu jirtaan sidii aad u wanaajin lahaybeen waxbarashadda ubadkiinna.

Si Daacadnimo ah,

William A. Kowba

Madaxa Waxbarashadda Dugsiyada Ku-meel-gaadh

**Somali version: 02-08 Supt Ltr Parents-Guardians re Budget**